Rooxaanland – Gunaanad

Hordhaca Gunaanadka

Waxaa jirta in akhristayaal badani afkaar, talooyin iyo tusaalaynba kasoo dhiibteen 2dii qaybood ee hore ee maqaalka. Waxaan si kal iyo laab ah ugu mahadcelinayaa intii qoraalada sida hufan wax uga soo tiri, gaar ahaanna, waxgaradkii wax ku soo darsaday qaybtii 2aad ee aan ku lafagurayey arrimaha tayaaraadka. Waxaan qolada dambe u sheegayaa, inaan hadafkaygu ahayn inaan weeraro ama difaaco qolooyinka aan kasoo hadlay. Haddii ka hadliddu ama tilmaamiddu gaf noqonayso, waxaan leeyahay "Ha layga raalli noqdo". Haddii kalese,"Cidna wax uma dhimin!!". **Maadaama aan hadaf kale u biyo shubanayo, ayay ila noqotay inaan aqoonteyda yar wax ku falanqeeyo(analyse) ama ku taxliiliyo**. Waxaana aaminsanahay inaanan diinta meelna uga dhicin! Cid isoo tirina "diintaad khalad ka sheegtay" ma jirto. Qoraalada isoo gaaray,marka laga reebo inta ii sharraxday arrinta 'Caqiidada' ee laysku haysto(oo mahad gaar ah iga mudan) , waxay u badnaayeen kuwo nuxurkoodu yahay "War maxaad annaga farta noogu soo fiiqday!" ama "Dhinaca kalaad tahay alyacni Suufi!". Marakan,gunaanadku wuxuu idiinka baahan yahay hirgelin ee faallo keliya uma baahna. Teeda kale, waxaan akhristayaasha waxgaradka ah, si gaar ah uga codsanaya inay qaybtaan oo ah nuxurka iyo biyo shubadka maqaalka, mid waliba uu email ugu sii diro asxaabtiisa kale ee waxgaradka ah – si soomaali fara badani u arkaan, talana uga soo dhiibtaan. Mar kalaan idin leeyahay "Weydin kaa!!"

***** ***** ***** ***** ***** ***** ***** ***** ***** *****

Q. (So / A) = SF (Soomaali fayow) **SF . Mq = S (Soomaali)** **So . Si = D (Dawladnimo)** **Rooxaanland – Rooxaan – Land = Somalia** (**Qoraalka wada akhri si aad u fahantid**)	 **Si = Silsiladda waxgaradka Soomaaliyeed ee Baaskiilka Dawladnimo dhaqaajin karta!!!** (**Qoraalka wada akhri si aad u fahantid**)

Mar haddaynaan isu jeedin, oo rooxaantu nagu kala dhex jir jirto, waxaa loo baahan yahay in bal daawada ka hor lays dareemo! Si arrintaan loo fahmo, ayaan wada hadalkaan soo socda ee aan dhabta u dhicin curiyey:

- Maxay ku dhacday in 20 sano aydaan weli xal u helin xaalka aad ku sugan tihiin?
- Shisheeye baa nugu dhex jira!
- Yaa idiin keenay shisheeyaha?
- Soomaalida laftigeeda!
- Xaggee joogaan soomaalida u yeeratay shisheeyaha?
- Meel kastay joogaan

- Waa kuma qofkaan ku ag taagan?
- Qofkee? Qofna uma jeedee.
- Oo xataa hadalkiisa maqlimaysid miyaa?
- Rooxaan hadlaysa baan maqlayaa
- Waa yaab! Rooxaanta aad u jeeddid, ma taaban kartaa?
- Maya.Waa khatar! Gacantaa dhex geleysa!
- Haddaba, bal isku dey inaad gacantaada rooxaanta dhex marsiisid…Illaa wax ku ceshaan oo aad taabatid!

Baqdin iyo argagax baa bilawday. Wax yar keddib, sidii la faray yeelid.

- Alla! Wax baan taabtay!
- Wax sidee ah?
- Wax jirkeygoo kale leh baan taabtay!
- Ma arki kartaa?
- Maya. Rooxaanta ka sokeysa.
- Iyada si fiican miyaad ugu jeedda?
- **Haa. Dhawr oday oo aan hebel iyo hebel oran karo, oo isku dhex malaasan baan u jeedaa!!!**

Meel kale oo muraayad weyni ku dheggan tahay baa la yimid.

- Kaalaya adiga iyo rooxaanta aad u jeeddidba, oo muraayaddaan hor istaaga oo isku fiiriya.
- Alla! Alla!. Acuudu Billaahi! Bisinka! War odayaashii meeye?
- Maxaa dhacay?
- Odayaashii maxaa ku dhacay? War waa muraayad sixran!
- Muraayaddu ma sixranee adaa falan! Maxaad hadda u jeeddaa?
- Aniga iyo qof kale.
- Ma qof shisheeye ahbaa?
- May. Wallee waa soomaali!!!
- Kaalay, oo meeday rooxaantii?
- Adaa iska dhaadhiciyaye, meesha rooxaani ma joogto. Waxaan jirinna muraayad kama arki kartid!!!

***** ***** ***** ***** ***** ***** ***** *****

Intaanan u gudbin soo bandhigidda daawada ay iigu muuqatay inaan u baahannahay, ayaan 4 arrimood, mid walba si kooban u xusayaa. Waa arrimo runtii mudan in carrabka lugu dhufto:-

1- Waxaa jirta in walidiin badani ay carruur ku dhaleen oo ku korinayaan qurbaha. Waana arrin dani keentay, oo dalkii lugulama noqon karo. Dalalkii Islaanimadu naga dhexaysayna, nooma oggola inaan la degno,oo ka shaqaysanno, si carruurtu noogu badbaaddo! Halkii nala taakulayn lahaa, sida Falastiinta, ayaa tarxiil(dal-ka-musaafirin) naloo qoray. Waalidiinta badankood waxay ka gaabiyeen amaba gabeen inay carruurtooda baraan dhaqankooda, hiddahooda iyo afkooda hooyo!!! Qaar waxay la noqotay in afafka kale ay cilmi yihiin; qaar waxay la noqtay inaan waxaas looba bahnayn; qaar weli raadinaya barayaal ay isku rooxaan yihiin oo carruurtooda af soomaaliga bara; qaar carruurtooda dugsiyo carbeed geeyey; iyo qaar kaba faanaya!!! Markii Xamar la joogay, waxaa la maqli jiray: **Ciyaal Waaberi; Ciyaal Wardhiiglay; Ciyaal Boondheere; Ciyaal Bacaad iwm**. Maanta, waxaad intiina aan ogayni ogaataan, inaad qurbaha ku korinaysaan: **Ciyaal Maraykaan; Ciyaal Jarmal; Ciyaal Iswiis; ciyaal Ingiriis Iyo Ciyaal Eskiimoos, iwm !!!!!!**
2- Wadaaddada qurbaha joogana mid baan leeyahay. Horta aad baan u qadarinayaa cilmigiinna iyo dadaalkiinaba. Waxaan maqli jiray ‘wadaad waa nin’ iyadoo arrin kale laga wado, haddase waxaan idiinla hadlayaa Rag ahaan (maa daama Raggii uu u

batay wadaaddo, kuwa dabayaal; kuwa kuwaas sii dabayaal; iyo kuwo kuweer sii dabayaal!!!). Nimanyohow, ma waan xanuun iyo walbahaar idinku hayn burburka dalkii iyo dadkiiba ku dhacay? Yaad dalkii ku hallayseen? **Mise arrintiinnu waa "Ardu Laahi waasac!!!". Ma la hijrooday!!!!** Ma waxaad door bidden inaad nolosha inta idiinka hartay aad meelo ciriiryoon sida **qolalka Paltalk(yada)** ama dalal dadow ku dhammaysataan, idinkoo muxaadareynaya!!!?? Ma weydaan ka fakarayn, in inta dalkii la hagaajiyo, lugu noqdo, keddibna aad ka shaqaysaan Matalan wasaaradda arrimaha Diinta, Maxkamadaha, dugsiyada (hoose, dhexe, & sare) iyo Jaamacadaha dalka???

3- Walaalahayaga gobollada waqooyina mid baan iyagana leeyahay. Anigoo og, aadna uga xun, welibana tixgelinaya dhibaatada walaalahiin idin soo gaarsiiyeen iyo go'aankaad ka gaarteen, ayaan haddana idin leeyahay, 'Ma aydaan aasiibiin go'aankii saxa ahaa!! Go'aankaad gaarteen, intayadii kale ayuu 'Dhul la'aan" ka dhigay! **Idinkaa 'Dhulkii soomaalida ama Somaliland' qaatay!!!** (Waa sarbeeb ku wajahan magaca aad la baxdeen!!). Teeda kale, goosashada waxaad qiil iyo xudduudba uga dhigteen, **inaynaan isku isticmaar(gumeysi) soo ahayn**!!!!!!!!!! Dagaalkii 2aad keddib, markii Talyaaniga la jebshay, waxaa dalkoo dhan wada qabsaday oo xukumayay Ingiriiska (British-ka). **Dhawr sano ayaan waxaan wada ahayn 'Soomaalilayn ama British somalilanders'**. Haddaan koofurta Talyaaniga lugu celin lahayn, oo aan sidaas gobanimo ku qaadan lahayn, keddibna wixii goosashada idinku kallifay ay dhici lahaayeen, oo aad goosan lahaydeen, **HALKEE XUDUUD KA DHIGAN LAHAYDEEN??** Mise waxaad ku dhawaaqi lahaydeen "**Jamhuuriyadda R……land??"**. Walalayaalow, caqligu ha taliyo oo dib isugu noqda – oo ma kala go'i karnee, aynu iswalaalaysanno. Bal ka warrama,'haddii qof gacantiisa bidix ama midigi ay tiraahdo "Anigu jirka kama tirsani oo waan ka go'ayaa!!". Qofku ma yeeli karaa? Hadduu yeeloo, gacantu go'do!!....Gacantu jir la'aan ma noolaan kartaa???!!! Jawaabtu wa 'maya'. Jirku wuxuu noqonayaa ama loogu yeerayaa, haddii gacani ka go'do "Jir Gacamay".

4- Ugu dambaystii, waxaan iyagana mid oranayaa qolada aan u bixiyay 'Ahlu Taako' ama 'Isbaariistayaasha', ee bulshoweynta soomaalidu aysan si fiican ugu fiirsaan. Qoladaani waa 3 kooxood oo aan isku hadaf iyo ujeeddo toona lahayn. Waxaase ka dhexeeya mid: Habka ay isaga difaacaan ciddii la doodda ama usoo jeedisa talooyin ama aragtiyo ka duwan tooda.
    - Jaamiciin **ingaaban-garato** ah oo had iyo jeer, "beesha caalamku ma oggola arrintaan" kugu taakaynaya!!!
    - Rag diinta raacda, welina aan si fiican u wada baran, oo had iyo jeer "Itaqil Laah" aan garasho la socon, kugu taakaynaya!!!
    - Oday Rooxaameedyada oo had iyo jeer, "Looma dhamma" kugu taakaynaya!!!

    Waxaa la soo gaaray waqtigii ay ummaddu iska qaadi lahayd 'Jidgooyooyinkiina' oo aad noqon lahaydeen, kuwa usoo jeensaday ka shaqaynta danta iyo maslaxadda ummadda ama hawlgab (pension) ku dambeeya!!!

***** ***** ***** ***** ***** ***** ***** ***** *****

(**Q**)=Quraanku waa qaybta 1aad ee ugu muhiimsan, salkana u ah waxtarka daawada. Hadduu ka maqan yahay, daawadu shaqayn mayso, shuushka iyo rooxaantuna bixi mahayaan.

Markaad Quraanka, si qanaaca iyo faham leh u akhrisatid, oo aad si kal iyo laab ah, adigoo keligaa ah, xaalkaad ku sugan tahay ka fakartid, oo aad weliba lixda tiir ee Iimaanka salka u ah ku khilaaweysid…Tashwiish walboo kugu jiray, ama rooxaan kastoo ku saarnayd ama kuu muuqatayba, wey kaa tegayaan.

Bal adigoo indhaha isku haysta, maskaxda wax ku fiiri! Filim isugu jira naxdin, shalayto, hammi iyo/ama farax ayaa kuu shidmaya. Haddaan faraxa ku horreeyo, waxaad ogaanaysaa inaadan keligaa ahayn. Waxaad arkaysaa ummadda faraha badan ee aad ku dhex jirtid ee aad xubinta ka tahay. Dad aad isku nooc, nasab iyo isirba tihiin, oo aad af, diin, dhaqan, dhul iyo muuqaalba wadaagtaan.
Dhanka kale, waxaa si wadajir ah, iyagoo is feer socda, kuu muuqanaya, halka aad u socotidee lama huraanka ah iyo camalkaadii hore… wanaag & xumaan; shar & khayr; xaaraan & xalaal…Wixii aad kasoo samaysay baa hortaada ku kala miirmaya amaba labadaada dhinac u kala soocmaya!!!
Tan waxaa ka sii naxdin iyo argagax badan, markay kuu muuqdaan, waxa aad hadda ku dhexjirtid ee xumaan, dulmi iyo/ama xaqdarro ah iyo siday naftu ilbiriqsi kasta kaaga bixi karto.
Hadday kula ahayd, in rooxaantu mas'uul kaa ahayd, waxaa dib kuugu muuqanaya dembiyadaadii iyo dagaaladii aad soo gashay!

- Si kastood maanta ugu nooshahay meel nabdoon oo dalkii ama qurbaha ah;
- Si kastood xaas, carruur iyo/ama hanti u yeelatid;
- Si kastood cilmi farabadan u yeelatid;
- Si kastood mansab sare iyo madax u noqotid;
- Si kastood wadaad wacdiya u noqotid;

Haddaad wax soo fashay ama soo bi'isay, habayn walbay Firaashka kuugu iman, intaadan gam'in. **Ruuxii fakaraya** baa, isku hawla inuu raadsho islaax, toobadkeen, dembi-qirasho iyo cafis-dalbasho…**Kii kalese**, isagoo weli rooxaamaysan oo isu haysta inuusan cidna godob ka gelin…ayuu aakhiro iska xaadirinayaa…markii tiisa la gaaro.

Haddii khayr, wanaag iyo qarannimo la rabo, waa in xariigga Ilahay la wada qabsadaa, oo si dhab, Lillaahi iyo raganimo leh, loo wajahaa, wixii ummadda kala gaaray ee rooxaantu sababtay. **Raganimada oo ah in " Alle keliya laga baqo, lana awoodi karo, in la qiran karo, godob iyo/ama dulmi la galay" – "Ma gafe waa Ilaah".**
Ruux dhibban ama la dulmay, ma bilaabi karo islaax iyo dib-u-heshiin…Haddaan ruuxii dulmay ama dhibay uusan gafkiisa qiran oo uu weli iskula saxsan yahay, kuna faraxsan yahay inuu rooxaantiisa qurbaan u sameeyey (alyacni dad laayay!!!). Amaba hadduu gafafkiisii gartay, laakiinse uu cadaab ka door bidayo intuu qiran lahaa!!!!

So= Soomaalinimo:Qaybta 2aad ee daawaduna waa si fiican u fahmidda **"Soomaalinimada"**. Yaa Soomaali la oran karaa? Sidee Soomaali lugu noqon karaa? Soomaalida badankeed ma fahansana macnaha ay leedahay "Soomaalinimadu". Si kastoo loo soo maray dawladnimo iyo qarannimo, waxaa weli shaqaynaya caqligii rooxaanta…dhulka soomalida ee aad ogtihiin ballaarkiisa iyo baaxaddiisa, lama wada laha!! Qof walba meel rooxaantiisa keliya degto ama degi karto baa jirta! Weli lama garan in qofka soomaaliga ahi uu meeshuu rabo Soomaaliya ka degi karo!! Goofkaan, kayntaan ama hawdkaan rooxaan hebla baa degta ama degi jirtay ee aannu ka dhiganno "Land ama State" baa caqligii isugu soo ururay!!!
Waxaa haddaba loo baahan yahay wacyi gelin ku saabsan fahamka ereyga "Soomaali" iyo waajibaadkiisa & xuquuqdiisaba.
Adduunka laba siyood baa dal u dhalasho lugu helaa:

1- **U dhalasho** (**Jus sanguinis** – Latin: right of blood) – tus. Labadaada waarid ama midkood hadduu yahay Soomaali, adna waxaad noqonaysaa soomaali.
2- **Ku dhalasho** (**Jus Soli** – Latin: right of soil) – tus. Qofku meesha uu ku dhasho ayuu dhalashadeeda qaataa.

Labada siyoodba waxaan ku noqonaynaa "Soomaali . Faahfaahinta arrintaan waxaan u daayey waxgaradka aqoonta dheeriga ah u leh. Mid baanse ku soo koobayaa:-

Dalka iyo dhulka ma kala lihin (marka laga reebo meel ama dhul si sharci ah loo gatay).

- Magac kastood leedahay (tus. Meygaag, Ibrow, Jaamac, Janaqow, Shaahdiid iwm)
- Gobol kastood deggan tahay (tus. Hiiraan, Togdheer, Jubbada Hoose, Banaadir,iwm)
- Meherad kastood leedahay (tus. Takhtar, Fuundi, Siyaasi, Beeralay, Bacadle iwm)
- Nooc kastood tahay (tus. Ikhyaar, Inkaar, Ibtilo, Samawade, Burcad-badeed, Mooryaan, Najis najis dhalay iwm).

Giddigeen,waxaan wada nahay Soomaali isku xuquuq ah.

Mq= Magac-qoyska: qaybta 3aad ee daawadu, waa hirgelinta waxa loo yaqaan magac-qoyska ama '**Family name**(ka). Inta rooxaanta iyo abtiriskeedu jiro, marna soomaalidu gaari mayso, inay noqoto 'Shacab'. Waxaynu nahay ummad imtixaaman oo mid waliba dhabarka ku sido culayska ugu yaraan 30 awoowe!!! Waddamada horay u maray, waxay badankood qaateen magac-qoysyada. Ruux walba, waxaa magaciisa hore la socda kan qoyska – wax dhaafsiisan ma yaqaan…Qof waliba waa hebel hebel..Iswiis, Jarmal ama Talyaani ka ah (dalkiisa ama dibeddiisa ha jooge). Hadday degaan noqotana, gobolka uu dalkiisa ka deggan yahay ayuu kuu sheegaya. Qof waliba wuxuu leeyahay hal warqad aqoonsi…Annaguse, qof waliba wuxuu wataa ugu yaraan **dhawr iyo toban aqoonsi rooxaameed!!!** Carruurta soomaalida ee Yurub ku dhashay ama ku koray, Matalan, waxay yaqaanaan Magac-qoysyada keliya, haddaan waalidku sunta abtiriska barin.
Dad riyoonaya ayaad marmar ka maqlaysaa "kacdoonka shacabka". Shacab weli ma aanaan gaarin! Rooxaan hadba iska daba kacaysa baan weli haynaa.
Waddamada Islaamka qaarkood, sida Masar, Tuniisiya ama turkiya, waxay gaareen heer lugu tilmaami karo ,Shucuub' – Waxay isticmaalaan magac-qoysyada – laakiin Yaman iyo Liibiya, matalan, waa qabaa'il(rooxaan), sida annaga oo kale..
Arrintaani maahan mid haddiiba miro ka dhalanayaan,waxaase muhiim ah in hadda la bilaabo isticmaalkeeda – si jiilasha dambe uga faa'idaystaan uguna dhaqmaan – ugana badbaadaan rooxaanta noocyadeeda kala duwan!!!

A= Aqoon: Qaybta 4aad ee daawadu waa aqoonta. Run ahaantii, soomaali badan baa aqoon yeelatay, waxaase ku daboolan rooxaan! Markii rooxaantu meesha ka baxdo, ayaa qof waliba aqoontiisu muuqanayaa.
Haddaba daawadeennu waa sidatan:

- **Q.(So/A) = SF (soomaali fayow)**
- **SF . Mq = Soomaali**

Intaas markaan daawada uga haro, waxaa iga su'aal ah **„Sidee lugu gaari karaa dowladnimo ama qarannimo usoo noqon kartaa??"**

Tan iyo wixii ka dambeeyey bilawgii dagaalka sokeeye ee 1991kii, waxaa jiray isku deyidyo fara badan oo lugu doonayay in dawlad soomaaliyeed lugu soo dhiso! Wixii kasoo baxay isweydiin ma leh. War dhafoor buu ku yaal.
Fakar iyo islahadal badan keddib, waxaa iisoo baxay arrimahaan soo socda:-

Dagaaladii, weerarradii iyo fowdadii lugu riday dowladdii kacaanku, waxay kaloo sababeen in motoorkii baabuurka dowladnimo ay wax gaareen! Ama silsiladdii(**Si**) bushkuleetiga-bicycle chain- (baaskiilka) dowladnimo ay ka baxday halkay ku jirtay. Baabuur aan kacayn, darawal (siyaasi) kastoo xariif ahi, ma dhaqaajin karo. Sidoo kale,waxaa jirta silsilad isu haysa labada garangarood ee baaskiilka. Haddii silsiladdu ka baxdo, oo aan la gelin, lama wadi karo.

Waxaan 20 sano ka badan la harjadaynaa sidii baaskiilka dowladnimo loo istaajin lahaa, inta dhinacyada laga qabto, iyadoo rooxaantu wada socoto(4.5), keddibna loo dhaqaajin lahaa… Inta loo dhiibo ruux wadi yaqaan!!!! Wadayaashii waxay u qaybsameen, kuwo la kufay, markii rooxaantu sii daysay, iyo kuwo lugu kalsoonaan waayay oo la yiri „ka dega", iyagoo weli figfig leh!!!

Illaa maanta, ma jirto cid weli isweydiisay in baaskiilka silsiladi ku jirto iyo in kale!!!!!
Maxay dawlad kastoo lasoo dhiso ay u dhacdaa??
Waxaa lugu wada mashquulsan yahay: „War sidee u dhaqaajinnaa – Ma jiidnaa, ma qaadnaa, mise **qaab federal** baan ku daynaa? War yaa wadi yaqaan, oo aynu u dhiibnaa?". „Dhankee u dhaqaajinnaa – horey mise gadaal??
Maxay tahay silsiladda (**Si**) aynu u baahan nahay??
Waa mid guntimaheedu ay yihiin **WAXGARAD SOOMAALIYEED OO ISKU XIRIIRSAN (sida tusbaxa).** Waxgarad aan darawallo(alyacni siyaasiyiin) ahayn, laakiin noqda **AWOODDA SUURAGELINAYSA IN SIYAASIYIINTU WAX DHAQAAJIYAAN.**

Waxyaalaha wax dhaqaajiya sida matoorka baabuurka ama silsiladda baaskiilku meel qarsoon ama hoose bay ku jiraan.

Beesha caalamku waa u jeeddaa waxa harjad iyo figfig naga dhacaya. Intay cilladda jirta noo sheegi lahaayeen, waxay hadba noo keenaan darawallo xariifiin ah oo dalalkooda wax ku soo bartay! Inta aan sidatan ku sugannahay, iyaga waa u dan…Mashruucyo iyo dhaqaale farabadan ayaa qulqulaya…

Haddaba, aragti ahaan,waa sidatan, sidaan ku gaari karno dowladnimo, una noqon lahayn qaran mar labaad soo noolaaday:-
Qaabku waa inuu noqdo oo lasoo cesho 8dii gobol (**G**) ee hore ee soomaaliya.

- Q . 50So . 8G / C = 400 So = Si (silsilad) = Dawladnimo

Waxaan u baahan nahay 400 oo aaminsan Soomaalinimada (**So**) oo ka kala yimaada 8dii gobol ee hore, oo ka kooban rag iyo dumar ,isuguna jira waxgarad iyo culimo aqoon sare wada leh (heer jaamacadeed) – oo aan siyaasiyiin ahayn , kuna hamminayn inay noqdaan. 400 oo taariikhda ku gala **„DIB U DHISAYAASHII QARANKA SOOMAALIYEED"** Waxgarad ku xisaabtamaya in laga hor keenayo hagardaamo, niyad ka jebin iyo xataa in la khaarajin karo!!!

Dawlad kastoo ummadi leedahay waxaa silsilad Baaskiil (bicycle chain) u ah waxgaradkeeda. Shaqada darawalladu (siyaasiyiinta) waa gelin dambe!! Marka hore waa in la diyaarshaa wixii la dhaqaajin lahaa ama la wadi lahaa!!!! Khasab maahan, in darawalladu ay dadku ugu aqoon badan yihiin, amaba ugu caqli badan yihiin – Waxgaradka ummadi leedahay ayaa hawl u dhiibta ama kalsooni siiya.
Waxgaradka ummad aayaheeda ka talinaya (oo qaab **lobby** ah), waa midaan inta badan muuqan oo aadan aalaaba ka maqlaynin/arkaynin warbaahinta caalamka.

Ugu dambaystii, waa in la helo gobol nabdoon oo marti geliya 4ta boqol oo lugu shiro. Gobolkaas oo taariikhda ku gelaya **„GOBOLKII AY DIB UGA DHALATAY QARANNIMADII SOOMAALIYA"** Haddii dhawr gobol isu soo sharraxaan, waa in la diyaarshaa wax lugu kala saaro, amaba qori tuur loo sameeyo.

Haddaan marakan keligeen wax qabsanno oo aan dawladnimadeenii iyo qaranimadeenii soo ceshanno, waxaan beesha caalamka hadhow ku oran karnaa ama ula hadli karnaa sidatan:

- „Annagoo inta legdannay, aad isugu xanaaqnay, markaasna surgooyo iyo dibir seexato is kala daalnay, oo wada suuxsan , baad meel cidla ah naga hesheen…. Maanta waan soo wada miyirsannay…Ka naxow nafta waa!! **Waxaa nala yiraahdaa Soomaali oo heedhaha…. Nama taqaaanaaaniiine bal horta na barta!!!!“**

Rooxaanland – Rooxaan – Land = Allsomaliland = Soomaaliya

Waxaan waxgaradka soomaaliyeed, meel kastay joogaan ka codsanayaa, inay fikirka/talada aan soo jeediyay:

1. **Ay ku dhaqaaqaan inay HIRGELIYAAN!!!**
2. **Ama ay SAXAAN!!!**
3. **Ama ay WAX KA BADDALAAN!!!**
4. **Amaba ay Xal kaloo BADDALKIISA KEENAAN!!!!!!!!!!**

Mid **5aad** iyo/ama inaad ka aamustaanba idinka yeelimayo!!!!!!!! Kubbadda xaggiinaan u soo tuuraye… Weydin kaa!!

Intaa iyo
Nabadgelyo iyo nooli kulanto

Xaashi Yaasiin Cismaan
Switzerland

Hashiyosman@hotmail.com

01.07.2011